



Folkhälsomyndigheten

TILL DIG SOM HAR DAGLIG HJÄLP AV HEMTJÄNST, FEBRUARI 2024, SOMALISKA

Ku socota adigaaga si maalinle ah caawin uga hela shaqaalaha adeegga guriga

Hay'adda Caafimaadka Dadweynaha waxay ku talinaysaa in hal talaal oo ka hortagga covid-19 aad qaadato adigaaga ah 65 jir ama ka weyn una baahan daryeel shakhsiyani oo aad ka hesho shaqaalaha adeegga guriga ama wax u dhigma. Tani waa si loo yareeyo khatarta ah in loo baahdo daryeel caafimaad oo dhanka isbitaal ah.

Is talaal laba goor sanad walba

Dhammaan dadka ah 65 jir ama ka weyn una baahan daryeel shakhsiyani oo ay ka helaan shaqaalaha adeegga guriga ama wax u dhigma waxaa lagula talinayaa in ay iska talaalaan ka hortagga covid-19 laba mar sanad walba, xilliga gu'ga iyo xilliga dayrta labadaba. Adigaaga ah qof baahi u qaba caawinta daryeel shakhsiyani ah maalin walba waxaad khatar sareysa ugu jirtaa in lagu dhigo isbitaal haddii uu kugu dhaco covid-19, marka la barbar dhigo dadka kale. Tani waxay khuseysaa iyadoo aysan sabab u ahayn in aad u baahantahay caawin dhanka gudaha guriga ah.

Talo bixintan waxay khuseysaa xitaa dhammaan dadka ah 80 jir ama ka weyn.

Difaac ayaad leedahay haddii aad lagaa talaalay isla markaana uu kugu dhacay covid-19

Adigaaga is talaalay xilligii dayrta ee weliba uu ku dhacay covid-19 intii ka dambeysay 1-da Oktoobar waxaad ku xisaabtami kartaa inaad leedahay difaac fiican xitaa inta lagu jiro xilliga gu'ga iyo xagaaga. Markaas adigu ma u baahnid in aad qaadato qayb talaal oo cusub inta lagu jiro xilliga gu'ga, laakiinse waxaad qaybtaada dambe qaadan kartaa xilliga dayrta.